

Buuxinta Qoraalada iyo ogeysiisyada Maqnaanshaha

Macluumaad loogu talagalay waalidiinta iyo xannaaneeyayaasha

Waa muhiim inaad u sheegto dugsiga haddii ilmahaagu uu ka maqnaanayo dugsiga oo aad bixisaa sababta maqnaanshaha.

Maamulayaashu sharci ahaan masuul ayey ka yihiin heynta diiwaan sax ah oo ku saabsan imaanshaha ardeyga.

Maamulayaasha waxay masuul ka yihiin go'aaminta haddii sababta maqnaanshuhu ay tahay mid cudurdaar leh.

Meel alaale meeshii suurtoagal ah, waalidiinta iyo xannaaneeyayaasha waxaa lagu dhiirigelinayaa inayka bixiyaan sharaxaad maqnaanshaha ka hor intuusan maqnaanshuhu dhicin.

Maamulaha dugsigu wuxuu xaq u leeyahay inuu su'aal ka weydiiyo codsiga waalidka ee ilmahooda inuu dugsiga ka maqnaado. Maamulaha wuxuu sidoo kale xaq u leeyahay inuu su'aal ka weydiiyo sharaxaad laga bixiyey maqnaanshaha ilmuhu uu kaga maqnaa dugsiga

Si ay u sharxaan maqnaan waalidiinta iyo xannaaneeyayaasha waxaa laga yaabaa:

- u dir qoraal, fakis ama iimeyl dugsiga
- wac dugsiga, ama
- dugsiga booqo

Qoraalka Maqnaanshaha Labada luuqadood

Saddex qoraal oo laba luuqadood ah ayaa la helayaa si uu kaaga caawiyo inaad wargeliso dugsiga ilmahaaga maqnaansho.

Absentee note 1 (Qoraalka Maqnaanshaha 1) waa in loo isticmaalaa marka ilmuhu maqan yahay 1 maalin oo dhan.

Absentee note 2 (Qoraalka Maqnaanshaha 2) waa in loo isticmaalaa marka ilmuhu maqan yahay 1 maalin wax ka badan.

Absentee note 3 (Qoraalka Maqnaanshaha 3) waa in loo isticmaalaa marka ilmuhu maqan yahay maalin barkeed.

Ogeysiiska Maqnaanshaha

Haddii uusan dugsigu helin wax sharaxaad ah oo ku saabsan maqnaanshaha ilmaha waxaa laga yaabaa inay kuu soo diraan Absentee Notice (Ogeysiinta Maqnaanshaha).

Maamulayaashu waxay isticmaalaan Absentee Notice si ay ula xirriiraan waalidiinta laba maalmood gudahood markuu jiro maqnaansho aan la sharxin. Absentee Notice waa in lagu qoraa Ingiriis oo lagu soo celiyaa dugsiga toddoba maalmood oo dugsii jiro, adoo bixinaya sababta maqnaansha

Buuxinta faahfaahinta maqnaanshaha

Qaybta Qoraalka Maqnaanshaha iyo Ogeysiinta Maqnaanshaha waxay ku

weydiinayaan inaad bixiso faahfaahin ku saabsan maqnaanshihii ilmahaaga ama maqnaanshihii qaybtii ahaa.

Si dugsigu u fahmo sababaha la bixiyey, qaybahan waa in lagu buuxiyaa Ingiriis. Sababaha macquulka waxaa lagu qoray warqadaan waxaana laguugu turjumay Ingiriis si aad ugu guuriso foomka, haddii ay khuseyso.

Haddii aad dhib kala kulanto fahmida Qoraalka Maqnaansha ama ogeysiinta Maqnaanshaha ama ku buuxinta faahfaahinta waxaad taleefan u soo diri kartaa dugsiga si aad ugu sharaxdo sababta maqnaanshaha ilmahaaga. Haddii aad taleefan u soo dirto dugsiga uma baahnid inaad soo qorto qoraal sidoo kale.

Adeega Turjumaanka Taleefanka

Haddii aad u baahan tahay turjumaan ku caawiya si aad ula xirriirto dugsiga ilmahaaga, fadlan wac Adeega Turjumaank Taleefanka 131 450 weydiisana turjumaan afkaaga ah. Turjumaanka ayaa wici doona dugsiga khadkana ku jiri doona si uu kaaga caawiyo wada hadalkiina. Adeegan wax lacag laguguma soo dalici doono.

Sababaha macquulka ah ee maqnaansho

Sabab caafimaad:

Fuluu (hargab)
Calool xannuun
Shuban
Hargab
Madax xannuun/Magraine
Xannuun xoog badan
Xumad
Laf jabtay
Mataq
Jiro infekshin leh tusaale busbus
Hunug (goror)
Neef
Finin
dhaawac
Ballan caafimaad
Ballanta ilkaha
Ballanta dhaqtarka indhaha
Ballanta duugida dabiiciga ah
Ballan dhakhtar takhasus ah
Kuwo – kale dugsiga ayaan soo wacayaa si aan ugu sharxo

Sabab qoys:

Aas
Guritaan
Imaanshaha ama bixitaanka qaraabo dhow oo dibada ka yimid
Ku lugyeelasho shil khatar ah oo qoys oo aan la baajin kareynin
Wax kale- dugsiga ayaan soo wacaya si aan ugu sharxo

Sabab kale :

Dhacdooyin aan la saadaalin iyo dhibaato Tusaale dab, daadad
Ka qaybgalka dhacdo khaas ah, tusaale tegida xaflad diimeed
Fasax qoys
Dhib gaadiid
Habsan aan la baajin karin
Wax kale- dugsiga ayaan soo wacayaa si aan u sharxo

Possible reasons for absence

Medical reason:

Flu
Stomach-ache
Diarrhoea
Cold
Headache/Migraine
Strong pain
Fever
Broken bone
Vomiting
Infectious illness eg chicken pox
Nose bleed
Asthma
Rash
Injury
Medical appointment
Dental appointment
Optometry appointment
Physiotherapy appointment
Specialist appointment
Other - I will telephone the school to explain

Family reason:

Funeral
Moving residence
Arrival or departure of an immediate relative from overseas
Unavoidable involvement in a serious family incident
Other - I will telephone the school to explain

Other reason:

Misadventure and unforeseen events eg fire, flood
Participation in special event, eg attendance at a religious ceremony
Family holiday
Transport difficulty
Unavoidable delay
Other - I will telephone the school to explain